Dawladda Puntland Ee Soomaaliya

Wasaaaradda Caddaaladda

# XEERKA DA'YARTA PUNTLAND

2016

FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 18 .5-aad. Garowe .28/12/2016. **Lam.12.**

Faafinta bil walba soo baxda جريدة الشهرية

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansixinta Xeerka Da'yarta ee Puntland.**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

*Xeer Lr .8. 28/12/2016, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Da'yarta ee Puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.8. ee 28/12/ 2016, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Da'yarta ee Puntland.

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

MARKUU ARKAY: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/ 102 / 2016 ee 28/12//2016;

MARKUU TIXGELIYEY: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Da'yarta ee Puntland;

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka Xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

Prof. Cabdiweli Maxamad Cali Gaas.
Madaxweynaha Dawladda Puntland.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

**DAWLADDA PUNTLAND**

**EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILADA**

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 102 /2016 Garoowe, Sabti Date:- 28/ 12 /2016

Garoowe

Ku:- Madaxweynaha DPL

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Da'yarta Puntland

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 64-aad |
| MARKUU ARKAY: | Soo gudbinta Madaxweyne ku xigeenka Ref: MWK/DPS/479/2016 ee Septemper.11/2016 kuna saabsan Ansixin Xeerka Da'yarta Puntland |
| MARKUU TIXELIYEY: | Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Da'yarta Puntland. |
| MARKUU ARKAY: | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 38-aad fadhigii 15-aad ee 13 /12 /2016 Xeerka Da'yarta Puntland. |

**Wuxuu Guddoomiyey:**

Ansixinta Xeerka Da'yarta Puntland

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

# TUSMO


XEERKA DA'YARTA PUNTLAND ..... i

CUTUBKA 1aad: ..... 1

Qodobka 1aad: ..... 1

Magaca Xeerka ..... 1

Qodobka 2aad: ..... 1

Erey bixin: ..... 1

Qodobka 3aad: ..... 2

Mabaadii'da Guud ee Hagaya Xeerka ..... 2

Qodobka 4aad: ..... 3

Ujeedooyinka xeerka ..... 3

CUTUBKA 2aad: ..... 4

Fullinta iyo Mas'uullyada Denbiga ..... 4

Qodobka 5aad: ..... 4

Qodobka 6aad: ..... 4

Go'aaminta da'da Da'yarta ..... 4

CUTUBKA 3aad: ..... 5

Edbin ..... 5

Qodobka 7aad: ..... 5

Edbinta Da'yarta ..... 5

Qodobka 8aad: ..... 5

Ujeeddada Edbinta ..... 5

Qodobka 9aad: ..... 6

Da'yarta u baahan in fa edbiyo ..... 6

Qodobka lOaad: ..... 6

U doorida Edbinta ..... 6

Qodobka 11aad: .......... 6
Kala Doorashada Hababka Edbinta .......... 6
Qodobka 12aad: .......... 7
Go'aanka ku Saabsan Amarka Edbinta .......... 7
Qodobka 13aad: .......... 7
Fulin la'aanta Amarka Edbinta .......... 7
Qodobk 14aad: .......... 8
CUTUBKA 4aad: .......... 9
Xarumaha Dhaqan Toosinta Da'yarta .......... 9
Qodobka 14aad: .......... 9
Yagleelidda Xarumaha Dhagantoosinta Da'yarta .......... 9
Qodobka.16aad: .......... 9
Waajibaadka Xaruumaha Dhagan toosinta .......... 9
Qodobka.17aad: .......... 9
Xilalka Xarumaha dhagan toosinta Da'yarta .......... 9
Qodobka 18aad: .......... 10
Noocyada Xarumaha .......... 10
Qodobka 19aad: .......... 10
Meelaynta Da'yarta. .......... 10
Qodobka 20aad: .......... 10
Qodobka 21aad: .......... 11
Dhismaha Guddiga Agaasinka .......... 11
Qodobka 22aad: .......... 11
Xilalka Guddiga Agaasinka .......... 11
Qodobka 23aad: .......... 12
Agaasimaha Fulinta .......... 12
Qodobka 24aad: .......... 12
Xeerarka nidaaminaya maamulka xarumaha dhaqan toosinta .......... 12
Qodobka 25aad: .......... 12

Shaqaalaha Xarumaha ..... 12
Qodobka 26aad: ..... 12
Awoodaha Wasiirka ..... 12
Qodobka 27aad: ..... 12
Diiwaangelinta iyo Qaabilaadda ..... 12
Qodobka 28aad: ..... 13
Wareejinta Da'yarta ..... 13
Qodobka 29aad: ..... 13
Qodobka 30aad: ..... 13
Nidaamka Cabashooyinka ..... 13
CUTUBKA 5aad: ..... 15
Baarista iyo Xorriyad ka Qaadista Da'yarta ..... 15
Qodobka: 31aad: ..... 15
Waaxda Booliiska u Qaabilsan Da'yarta ..... 15
Qodobka 32aad: ..... 15
Xariga Da'Yarta iyo Nabad-gelyadiisa ..... 15
Qodobka 33aad: ..... 15
Fullinta soo Qabashada Da'yarta ..... 15
Qodobka 34aad: ..... 16
Qodobka 35aad: ..... 16
Xuguugda Da'yarta maxkamadaynta hore ..... 16
Qodobka 36aad: ..... 17
Su'aal waydiinta ..... 17
Qodobka 37aad: ..... 17
Qodobka 38aad: ..... 18
Sii daynta Da'yarta ee Xeerlilaaliyaha Guud ..... 18
Qodobka 39aad: ..... 18
Qodobka 40aad: ..... 18
Dammaanad Ku siidayn ..... 18

Qodobka 41aad: ........ 19
Ku haynta da'yarta goob Nabad ah. ........ 19
Qodobka 42aad: ........ 19
Qodobka 43aad: ........ 19
Diiwaan gelinta Da'yarta saldhiga lagu hayo ........ 19
Qodobka 44aad: ........ 19
Da'yar aan la xiri Karin. ........ 19
CUTUBKA 6aad: ........ 20
QIIMAYNTA DACWADDA DA'YARTA GEFTAY. ........ 20
Qodobka 45aad: ........ 20
Qiimaynta Da'yarta ........ 20
Qodobka 46aad: ........ 20
Qiimaynta Warbixinta ........ 20
CUTUBKA 7aad: ........ 21
DHEGEYSIGA HORE ........ 21
Qodobka 47aad: ........ 21
Qodobka 48aad: ........ 21
Goob joogayaasha dhegaysiga hare ........ 21
Qodobka 49aad: ........ 22
Habraaca Qabashada Dhegaysiga Hare. ........ 22
Qodobka 50aad: ........ 22
Qodobka: 51aad: ........ 23
Haynta dheeradka ah ee Da'yarta kadib dhagaysiga hore. ........ 23
Qodobka 52aad: ........ 23
Dib u Dhigga Dhegaysiga hore ........ 23
CUTUSKA 8aad: ........ 24
Has Raaca Maxkamadda ........ 24
Qodobka 53aad: ........ 24
Qodobka:54aad: ........ 24

Noocyada iyo Muddada Maxkamad Horgaynta Da'yarta. 24
Qodobka 55aad: 24
Qodobka 56aad: 25
Qodobka 57aad: 25
Habka furitaanka dacwadda 25
Qodobka 58aad: 25
Caddaymaha 25
Qodobka 59aad: 25
Su'aalaha Liddiga ah 25
Qodobka 60aad: 26
Ogolaanshaha Caddaymaha. 26
Qodobka 61aad: 26
Qodobka 62aad: 26
Muddada Dacwadda 26
CUTUBKA 9aad: 27
XUKUNKA 27
Qodobka 63aad: 27
Xukunka 27
Qodobka 64aad: 27
Ujeedooyinka Xukunka 27
Qodobka 65aad: 27
Xirista (Xabsi gelinta) 27
Qodobka 66aad: 28
Xukunka Bulshadu Gaarto 28
Qodobka 67aad: 28
Da'yarta Mutaystay in lagu meeleeyo xarun dhaqan toosin 28
Qodobka 68aad: 28
Ciqaabaha Manuuca ah in Da'yarta lagu qaado 28
CUTUBKA 10aad: 29

Qodobo Qubanayaal ah ........ 29
Qodobka 69aad: ........ 29
Hor istaagid ........ 29
Qodobka 70aad: ........ 29
Baahinta Reebban ........ 29
Qodobka 71aad: ........ 29
Rafcaanka ........ 29
Qodobka 72aad: ........ 30
Xeerar Samayn ........ 30
Qodobka 73aad: ........ 30
Burin ........ 30
Qodobka 74aad: ........ 30
Dhagan galka Xeerka ........ 30

# XEERKA DA'YARTA PUNTLAND

Garoowe, December/2016

# CUTUBKA 1$^{aad}$:

## Qodobka 1$^{aad}$:

### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeerayaa Xeerka Da'yarta

## Qodobka 2$^{aad}$:

### Erey bixin:

| | |
|---|---|
| Da'yar: | Waxaa loola jeedaa qofkasta oo da'diisu gaartay 14 sano kana yar 18 sano. |
| Mas'uul: | waxaa loola jeedaa waalidka da'yarta ama sharci ahaan gof mas'uul ka noqon kara ama qof maxkamadi u xilsaartay xanaanayta da'yarta. |
| Edbin: | Waxaa loola jeedaa amarada iyo go'aamada ka soo baxa Garsooraha ee looga dan leeyahay in lagu dhaqan toosiyo da'yarta geftay. |
| Maxkamadda Da'yarta: | Waxaa loola jeedaa Maxkamadda Dhagaysata go'aana ka gaarta dacwadaha uu xeerinayo xeerkan. |
| Waaxda da'yarta ee saldhigga: | Waxaa loola jeeda waax u qaabilsan booliiska qaabilaada da'yarta. |
| Xarumaha Garsugaha: | Waxaa loola jeedaa xarumaha lagu hayo Da'yarta gar-sugayaasha ah ee lagu aasaasay Xeerkan. |
| Xoriyad ka qaadis: | Waxaa loola jeedaa qaab kasta oo lagu xadidayo xoriyadda Da'yarta sida haynta, Xariga iyo ku meelaynta goobaha dhaqan toosinta. |
| Gal-dacwadeed: | waxaa loola jeedaa liiska dacwadaha boolisku hayaan ee maxkamad gaynta sugaya. |

| | |
|---|---|
| Xarun Furan: | Waxaa loola jeedaa xarunta dhaqan toosinta da'yarta geftay ee aan si aad ah loo xadidayn dhaqdhaqaaqa da'yartuna si buuxda ula xiriiri karaan bulshada. |
| Xarun Xiran: | Waxaa loola jeedaa xarun dhaqdhaqaaqa da'yarta Leexatay gudaheeda iyo dibadeeda loo ogol yahay balse la kormeerayo. |
| Wasiir: | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Caddaalada. |
| Sarkaalka kormeerka: | Waxaa loola jeedaa sarkaal la shaqeeya maxkamada da'yarta ee masuulka ka ah qiimaynta iyo kormeerka barnaamijka jihaynta da'yarta. |

# Qodobka 3aad:

## Mabaadii'da Guud ee Hagaya Xeerka

Maxkamadda ama ciddii kale ee gudanaysa shaqo la xiriirta qodobada xeerkan waxaa hagaya shaqadooda, shareecada islaamka, dastuurka iya xeerarka kale ee dalka.

1. Ilaalinta xuquuqda da'yarta
2. Mabda'a in loo aqoonsado da'yarta denbi laawe ilaa maxkamad sharci ahi ku hesho denbiga si kama damays ah;
3. Mabda'a ilaalinta sharafta da'yarta;
4. Mabda'a xaqa dhagaysiga da'yarta;
5. In dhammaan hawlaha lagu toosinayo da'yarta ay noqdaan kuwa lagu saleeyo hadba meesha danta ugu habboon ugu jirto;
6. Mabda'a mas'uuliyadda qoyska;
7. Mabda'a badbaadada; (in aan da'yarta dhib loo gaysan, lagu xadgudbin, laga faa'iidaysan, si xuna loola dhaqmin).
8. Mabda'a in aan da'yarta la bahdilin oo la ceebayn af iyo adin toona;
9. Mabda'a inaan da'yarta xuquuqdiisa la duudsiin;
10. Mabda'a sinnaanta iyo faquuq la'aanta;
11. Mabda'a ilaalinta xaqa da'yarta u leeyahay in aan laga sheegin arrimaha u gaarka ah (khusuusiyadda) iyo sirihiisa;
12. Mabda'a in da'yartu hesho maxkamad caddaalad ku dhisan oo dhaqso ah;
13. Mabda'a in xariga da'yartu yahay xalka kama dambaysta ah ;

# Qodobka 4aad:

## Ujeedooyinka xeerka

Ujeedaayinka xeerkan waa in ay noqdaan:

1. Ka hortagista gefka iyo dhaqantoosinta da'yarta.
2. Dib wax u baridda da'yarta geftay ee aan hab-dhaqankooda lagu hagaajin karin waxbarashada toosan iyo daryeelka waalidka.
3. Dhiirigelinta iya kormeeridda hay'adaha ka shaqeeya daryeelka dadwaynaha iya adeegga bulshada si ay u siiyaan daryeel iyo ilaalin da'yarta.
4. lIaalinta xuquuqda da'yarta si waafaqsan shareecada islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka

# CUTUBKA 2aad:

## Fullinta iyo Mas'uullyada Denbiga

## Qodobka 5aad:

Fullinta xeerka iyo masuuliyadda denbi gelista.
Xeerkan waxaa lagu fulinayaa-

1. Qofkasta oo gudaha Puntland ku sugan, oo lagu eedaynayo inuu denbi galay oo ka yar 18 sano, iyada oo aan loo eegayn dhalashadiisa, wadanka uu asal ahaan ka soo jeedo, ama xaaladiisa/meeqaamkiisa barakac.
2. Qofkasta oo dhamastay 14 sano ilaa da'da u dhaxaysa 18 jir, waxaa ay yeelanayaan mas'uuliyad denbi oo loo raacayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, balse ma aha mid dhamaystiran..
3. Qof kasta oo marka uu falka galay da'ahaan ay u dhamaystirantahay 18jir waxa uu yeelanayaa mas'uuliyad denbi oo dhamaytiran, waana in aan laga soo qaadin da'yar.
4. Haddii ay denbi wada galaan qof weyn iyo da'yar, da'yarta waxaa lagu qaadayaaa xeerkan, iyada oo dacwadda qofka weyn laga saarayo.
5. Marka lagu fulinayo da'yarta axkaamta denbi iyo kuwa habka la xiriira, waa in tixraac laga dhigtaa da'da da'yartu jirtay markii ay denbiga galeen.

## Qodobka 6aad:

## Go'aaminta da'da Da'yarta

1. Da'da da'yarta waxaa lagu go'aaminayaa sida ku xusan kaarka caddaynta wakhtiga dhalashada da'yarta.
2. Haddii da'yartu aanay lahayn kaarka cadaynaya wakhtiga dhalashada ama muuqaalka jireed muujinayo da' ka duwan mida kaarka caddaynta ku qoran waa in lagu hubiyaa da'da baarid dakhtareed.
3. Haddii dhakhtarku ku guul darreysto go'aan ka gaaridda da'da dhabta ah ee da'yarta, waxaa arrinta loo xilsaarayaa guddii dhakhaatiir ah oo ka kooban 3 dhakhtar.
4. haddii da'da lagu go'aamin waayo sida ku cad faqradda 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkan, shakina uu ku jiro in da'yartu 14 ka yar tahay ama uu u dhexeeyo 14 ilaa 18 sano, waxa laga soo qaadayaa in da'yartu jirto da'da ugu habboon ee ay dantu ugu jirto.
5. Haddii garsooraha da'yartu ay u cadaato in da'da da'yartu ka weyn tahay 18 sano wuxuu joojinayaa dhagaysiga hore ee dacwadda wuxuuna u wareejinayaa dacwadda maxakamda awooda u leh.

# CUTUBKA 3aad:

## Edbin

## Qodobka 7aad:

## Edbinta Da'yarta

1. “Edbin” waa habraac la xiriira in da'yarta lagu edbiyo habka loo raaco xeerka habka ciqaabta, loona edbiyo habab kale oo ku haboon, sida hab dhaqameedka bulshada, xeerarka caddaalada guud ee waafaqsan Diinta Islaamka iyo dastuurka Puntland. Amarada ka soo baxa garsoorahana waxa ka mid ah:
    - b) "**Amarka Qasabka ah ee Iskool Tegista**" waa amar ka doonaya da'yarta inuu maalin kasta tago iskuul waqti muddo ah oo la cayimay tegista iskuulka waxa hubinaya oo ilaalinaya qof la qoondeeyay.
    - t) "**Amarka Qoys la Joogga**" waa amar ka doonaya da'yarta inuu qoyskiisa la joogo saacado go'an.
    - J) "**Amarka Dhaqan Wanaagga**" waa amar ka doonaya da'yarta inuu ka soo baxo heshiiska dhex maray isaga iyo qoyskiisa kaasoo ah inuu fuliyo hab akhlaaqeed la isla meel dhigay.
    - x) "**Amarka la Socodka Saaxiibo Wanaagsan**" waa amar la doonayo da'yarta inuu la dhaqmo dad wax ka tari kara toosintiisa lana yimaado akhlaaq wanaag.
    - kh) "**Amarka Wargelinta**" waa amar ka doonaya da'yarta inuu waqti ama waqtiyo go'an uu wargeliyo qof loo gartay inuu la socdo hab dhaqankiisa.
    - d) "**Amarka Ilaalinta iyo Hanuuninta**" waa amar hoos keenaya da'yarta qof ilaaliya oo hanuuniya si uu ugu hago akhlaaq wanaagsan.
2. Wixii amaro edbin oo kale oo ka tarjumaya danta da'yarta .

## Qodobka 8aad:

## Ujeeddada Edbinta

1. Ujeeddada Edbintu waa:-
    - b) In la garto baahida gaar ahaaneed ee Da'yarta geftay.
    - t) In lagu dhiirigeliyo da'yarta xeerka u gafta in uu qaado mas'uuliyadda fal denbiyeedka uu gaystay.

j) In la dhiirigeliyo ka mid noqoshada da'yarta qoyskooda iyo bulshada.
x) In la dhiirigeliyo dib u heshiisiin dhex marta da'yarta iyo qofka ama bulshada dhibtu ka soo gaartay fal dambiyeedka da'yarta.

## Qodobka 9aad:

## Da'yarta u baahan in la edbiyo

1. Da'yarta waa in loo tixgeliyaa kuwa u baahan edbin haddii:-
   a) Da'yarta si ikhtiyaari ah oo iskii ah u ogolaado inuu dembiga geystay.
   t) Da'yarta iyo waalidkiisa ama mas'uul ku habboon booska waalidka ay ogolaadaan edbinta iyo kala doorashada hababka edbinta.
   j) Fal dembiyeedka la galay ciqaabtiisu tahay xarig ka yar shan sannadood marka loo eego xeerka ciqaabta Soomaliyeed.
   x) Aanay jirin caddayn ku filan oo ilmaha lagu maxkamadayn karo.

## Qodobka lOaad:

## U doorida Edbinta

1. Marka da'yar gaar ah loo doorayo edbin iyadoo lagu jiro dhegaysiga hare waa in la tixgeliyo:
   a) Caafimaadka da'yarta iyo hab dhaqankiisa
   t) Heerkiisa aqooneed, awooddiisa wax-garasho iyo xaaladdiisa guri iyo deegaan.
   j) Isu-dhignaanta doorashada habka edbinta la door biday iyo xaaladda da'yarta iyo nooca fal dambiyeedka.
   x) Da'da iyo baahida korriimo ee da'yarta.

## Qodobka 11aad:

## Kala Doorashada Hababka Edbinta

1. Xeerkani wuxuu ula jeedaa kala doorashada hababka Edbinta :-
   b) Raalli-gelin afeed ama qoraal ah oo la siiyo qof gaar ah, dad ama hay'ad (da'yartu u gaftay).
   t) Digniin rasmi ah oo la siiyo da'yarta si waafaqsan sharciga ..
   j) In da'yarta loo diro qoyskiisa si ay meel cayiman ugu ogaadaan muddo cayiman.
   x) In loo diro inuu raaco koox akhlaaq wanaagsan .

kh) Udiris, la talin, ama daawayn in muddo ah.
d) Tegid khasab ah meel cayiman oo laga barto xirfad gaar ah ama ujeeddo Waxbarasho in muddo ah.
r) In la bixiyo magdhaw u qalma oo la siiyo qof, dad ama hay'ad cayiman (oo loo gafay).
s) In shay cayiman loo celiyo dhibbane ama dhibbanayaal cayiman.
Sh) In dib loogu celiyo da'yarta gurigiisa iyo degmada uu ku dhashay iyadoo ay kharashka bixinayso dawlada hoose.
Dh) ln loo dhiibo oo uu daryeelo qof u qalma ama mac-had barbaarineed oo lagu xusay amarka edbinta, kuwaasoo diyaar u ah inay daryeelaan da'yarta.

2. Markay dhacdo in la doorto habka edbinta, waxaa garsooraha da'yarta laga doonayaa inuu tilmaamo sarkaal dhaqan-toosin oo kormeera in da'yartu raacay iyo in kale habka edbinta loo doortay.
3. Haddii ay dhacdo in da'yartu fulin waydo shuruudihii habka edbinta ee la doortay, sarkaalka kormeeraya waa inuu ku wargeliyaa garsooraha da'yarta si qoraal ah, fulin la'aanta da'yarta.

## Qodobka 12aad:

### Go'aanka ku Saabsan Amarka Edbinta

1. Garsooraha da'yartu waa inuu hubiyo in da'yarta gefay la edbin karo ka dib markuu tixgeliyo.
   b) Soo-jeedinta xeer lIaalinta.
   t) Warbixinta qiimaynta sarkaalka kormeerka.
   j) Fikradaha ay qabaan dhammaan dadka xiriirka la leh da'yarta sida: waalidka goobjooga ka ahaa dhagaysiga hore.
2. Garsooraha da'yartu markuu la tashado dadka kor ku xusan waa inuu go'aamiyo habka edbineed munaasibka ah.
3. Xaaladaha edbinta waa la isticmaali karaa, wakhti kasta oo ka horaysa go'aan gaarista dacwadda.

## Qodobka 13aad:

### Fulin la'aanta Amarka Edbinta

1. Haddii ay da'yartu fulin waayaan amarka ku saabsan edbinta, garsooraha da'yartu markuu helo caddayntaas fulin la'aanta ah, wuxuu soo saari karaa amarada horgeynta ee ku xusan xeerkan.

2. Marka da'yartu hortimaado garsooraha da'yarta waa inuu dhegeysto cududaarka keenay in la fulin waayo amarkii edbineed.
3. Marka uu garsooruhu dhagaysto cududaarka keenay inuu fulin waayo amarkii edbinta wuxuu garsooruhu qaadi karaa talaabooyinkan:
    b) Inuu dabbaqo doorashadii edbinta ee hore iyadoo shuruudaha wax laga beddelay.
    t) Inuu dabbaqo doorashada edbinta (oo hab kale adeegsado)
    j) Inuu soo saara amar ku habboon in la hir-geliyo doorashadii habka edbinta ee hore.

## Qodobk 14aad:

Halbeegyada ugu yar ee laga doonayo xarumaha dhaqantoosinta (Edbinta) iyo xulashooyinka:

1. Da'yarta gala fal-gef ah waa in aan laga cayrin barnaamij dhaqantoosin oo uu ku jiray iyadoo ay sabab u tahay in aanu iska bixin Karin lacagtii barnaamjikaas.
2. Da'yarta gefta waxaa looga baahnaan karaa in uu sameeyo hawlo bulshada lagu taageerayo taasoo qayb ka ah barnaamijka edbinta iyadoo la eegayo hadba da'ada iyo horumarka jir iyo maskaxeed ee da'yarta;
3. Khiyaarka Edbinta -
    b) Waa in la dhiirigeliyaa sharafta iyo badbaadada da'yarta gefka galay iyo horumarinta dareenkiisa ku aadan kalsoonida uu ku qabo naftiisa iyo awoodda uu u leeyahay in uu bulshadiisa horumarkeeda ka shaqeeyo ;
    t) Waa in aanu noqon mid dhiig-miirad ah ama khatar ku ah caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee da'yarta;
    j) Waa in uu ku habboon yahay da'da iyo hadba heerka qaangaar ee da'yarta; iyo
    x) In aanu carqaladayn in ilmihu iskuulka dhigto
4. Habka dhaqantoosin ee hay'ad dawladeed ama mid aan dawli ahayn ay u soo gudbiso wasiirka kaasoo ka soo dhalaalay waxyaalihii looga baahnaa sida ku cad qodobkaan, islamarkaasna leh waqti iyo hab go'aan oo ay adeeg joogto ah ugu fidin da'yarta khaldamay, waa mid wasiirku uu diiwaan gelin karo isagoo raacaya habka u qeexan.
5. Sarkaalka koormeerku waa in uu u hayaa diiwaanka da'yarta xeerka u gaftay habkii loogu talagalay.

# CUTUBKA 4aad:

## Xarumaha Dhaqan Toosinta Da'yarta

## Qodobka 14aad:

### Yagleelidda Xarumaha Dhagantoosinta Da'yarta

1. Wasiirka Caddaaladda ayaa go'aan (digreeto) ku yagleelaya xarumaha dhaqan toosinta da'yarta geftay.

## Qodobka.16aad:

### Waajibaadka Xaruumaha Dhagan toosinta

Ujeedooyinka xarumaha dhaqan toosinta waa in ay noqondaan:

b) Inay ka shaqeeyaan dhaqan toosinta iyo asluub toosinta da'yarta denbiyada gala iyadoo xabsi ku xiridda laga fogaanayo.
t) In da'yarta laga ilaaliyo goonina looga sooco dadka waaweyn ee xabsiyada ku jira, si loo dhowro da'yarta daryeelkooda, loogana ilaaliyo saameynta xun ee maxaabiista waaweyni ku yeelan karaan.
j) Inay noqdaan meelo lagu dhowro nabad-gelyada da'yarta, isla markaana waxbarasho iyo tababaro ay ka helaan.
x) In da'yarta lagu siiyo wixii taageero, daryeel iyo adeeg ah ee ay u baahan yihiin.
kh) In ay kaalmeeyaan una diyaarinayaan da'yarta in bulshada dib loogu celiyo, si ay u noqon karaan xubno toosan, waxtar leh oo bulshadana ka mid ah.
d) Inay xoojiyaan wada-shaqaynta iyo iskaashiga wasaaradaha iyo hay'adaha kala duwan si loo xaqiijiyo ama loo hubiyo inay da'yartu helaan daryeel iyo xannaano ku filan kuna haboon dhaqan toosintooda.

## Qodobka.17aad:

### Xilalka Xarumaha Dhagan Toosinta Da'yarta

1. Xarumaha dhaqan toosintu iyaga ayaa ka masuula da'yarta inta ay xarunta ku jirto.
2. Toosinta iyo haynta, kobcinta, aqoon iyo caafimaad, karaamada iyo dareenka masuuliyada da'yarta waa xilka aasaasiga ah ee xarumaha dhaqan toosinta.

3. Xarumaha dhaqantoosintu waxay kale oo fulinayaan xil kasta oo xeerku ku waajibiyo.

## Qodobka 18aad:

### Noocyada Xarumaha

Xarumaha dhaqantoosinta waxay u kala baxayaan saddex nooc iyada oo loo eegaayo culayska iyo noocyada denbi ee lagu eedaynaayo da'yarta oo ah sidan.

- b) Xarun furan oo aan ilaalo badan lahayn;
- t) Xarun xiran oo ilaalo leh;
- j) Xarun xiran oo ilaalo xooggan leh.

## Qodobka 19aad:

### Meelaynta Da'yarta.

1. Xarumaha dhaqan toosinta da'yarta la gaynayo iyo nooca uu yahay waxaa go'aan ka gaaraysa maxakamadda awoodda u leh.
2. Maxkamaddu marka ay go'aanka ka gaarayso nooca ay tahay xarunta da'yarta lagaynayo waa inay tixgeliso arrimaha soo socda:-
   - b) Da'da iyo jinsiga (dheddig iyo lab) ee da'yarta;
   - t) Culayska iyo dabeecadda denbiga ay galeen;
   - 1. Xaalada guud ee da'yarta jir ahaan iyo maskax ahaanba.

## Qodobka 20aad:

Maamulka xarumaha dhaqan toosinta da'yarta

1. Xarumaha dhaqan toosinta da'yarta waxaa maamulaya guddi agaasin oo madax bannaan.
2. Xubnaha guddiga waxaa labadii sanoba hal mar soo magacaabaya wasiirada wasaaradaha ay ka tirsan yihiin ee ku xusan Qodobka 21aad.
3. Guddiga agaasinku waxay kulmayaan saddexdii biloodba hal mar ugu yaraan, waxaana u banaan kulamo aan caadi ahayn, marka uu sidaas soo jeediyo madaxa agaasinku xubnaha kalena ogolaadaan, waxaa kale oo banaan in saddex meelood laba meelood soo jeediyaan kulan aan caadi ahayn.

# Qodobka 21aad:

## Dhismaha Guddiga Agaasinka

1. Guddiga Agaasinku waa inuu ka koobnaadaa wakiilo ka kala socda.
    - b) Wasaaradda Caddaaladda;
    - t) Wasaaradda Waxbarashada;
    - j) Wasaaradda Caafimaadka ;
    - x) Wasaaradda horumarinta Haweenka iyo Arrimaha qoyska
    - kh) Wasaaradda amniga
    - d) Wasaarada arrimaha gudaha.
    - r) Difaacaha xuquuqul insaanka
    - s) Booliiska
    - sh) Culimada
    - dh) Hay'adda daryeelka bulshada
    - c) Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha, Dhallinyarada iyo isboortiga.
2. Hay'ad walba oo kor ku xusan waa in ay soo magacawdaa xubin wasiirka wasaaradda caddaaladdu kusoo saara dikreeto .
3. Xubinta guddiga agaasinka waxaa xilka ka fariisin kara ciddii soo magacawday iyada oo cuskanaysa xeer hoosaadka guddiga.
4. Guddiga agaasinka ee ku magaacaaban faqrada l'aad ee qodobkaan, waxa ay iska dhex dooranayaan, gudoomiye, gudoomiye ku-xigeen, agaasime fulineed iyo xoghayn.

# Qodobka 22aad:

## Xilalka Guddiga Agaasinka

Guddiga Agaasinku waa in ay:-

1. Diyaariyaan baahida xarumaha
2. Booqdaan xarumaha dhaqan toosinta;
3. U soo gudbiyaan warbixino rasmi ah iyo talooyinba cidda ay khusayso.
4. La xiriiraan hay'daha ay wada shaqaynta leeyihiin ogolaansho, si ay uga helaan in dib loogu toosin karo da'yarta xeerka ku geftay bulshada.
5. Ka kaalmeeyaan da'yarta wax kasta oo u suurto gelinaya ku noolaanshahooda nolol caafimaad qabta, dhaqankooduna wanaagsanaado.
6. Abuuraan sanduuq loogu kaalmeeyo da'yarta tabarta daran ee Xeerka ku gaftay iyo hawlkasta oo wax ka tari karta dhaqan toosinta da'yarta.

## Qodobka 23aad:

### Agaasimaha Fulinta

1. Guddiga agaasinku waxa ay yeelanayaan agaasime fulineed oo ay iska dhex dooranayaan labadii sanoba hal mar.
2. Guddiga agaasinka ayaa awood u leh inay xilka ka fariisiyaan agaasimaha fulinta.
3. Agaasimaha fulinta waxa uu fulinayaa hawl-maalmeedka, awaamiirta iyo go'aanada ka soo baxa guddiga agaasinka.

## Qodobka 24aad:

### Xeerarka nidaaminaya maamulka xarumaha dhaqan toosinta

1. Xarumaha dhaqan toosinta waxaa lagu fulinayaa Qodobada Xeerkan
2. Xeer hoosaadka ay dejiyaan Guddiga Agaasinku.

## Qodobka 25aad:

### Shaqaalaha Xarumaha

1. Dhammaan shaqaalaha xarumaha dhaqan-toosinta da'yarta waxa lagu soo xulayaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawlada Puntland.
2. Dhammaan shaqaalaha xarumaha dhaqan-toosinta da'yarta waxaa la siinayaa tababar la xiriira arrimaha da'yarta oo ku filan, kuna habboon ka hor in taanay shaqada gelin.

## Qodobka 26aad:

### Awoodaha Wasiirka

Wasiirka caddaaladdu wuxuu digreeto guud ku soo saarayaa arrimaha la xiriira habsami u socodka xarumaha dhaqan-toosinta, abaabulka iyo dhismaha maamulka xarumaha dhaqan toosinta da'yarta.

## Qodobka 27aad:

### Diiwaangelinta iyo Qaabilaadda

1. Ma bannaana in da'yar lagu qaabilo xarumaha dhaqantoosinta, haddii aanu la socon amar maxkamadeed oo sidaas faraya.

2. Faahfaahinta uu xambaarsan yahay amarka maxkamaddu waa in markiiba la geliyo diiwaanka.
3. Waa in diiwaankaasi uu yaallo xarun kasta oo dhaqantoosineed.
4. Waa in da'yarta la fahansiiyaa xuquuqda iyo waajibaadka uu leeyahay inta uu joogo xarumaha dhaqan toosinta.
5. Marka da'yarta lagu qaabbilo xarunta dhaqantoosinta, waxaa waajib ah in laga caawiyo in ay fahmaan.
    - b) Xeer-hoosaadka lagu hagayo xarunta;
    - t) Hadafka, ujeedooyinka iyo dariiqooyinka adeeg iyo taageerada uu helayo;
    - j) Nidaamka iyo anshaxa da'yarta looga baahan yahay;
    - x) Habka da'yartu uga caban kartoo wixii dhib ah;
    - kh) Arrin kasta oo muhiim u ah in da'yartu si buuxda u fahamto xaqooda iyo waajibaadkooda inta ay ku jiraan xarumaha dhaqan toosinta.

## Qodobka 28aad:

### Wareejinta Da'yarta

1. Ma bannaana in da'yarta laga wareejiyo xarun loona beddelo mid kale si aan xeerka waafaqsanayn.
2. Wareejinta da'yarta waxaa awood u leh maxakamada da'yarta oo keliya.

## Qodobka 29aad:

Gaadiidka da'yarta lagu qaadayo

1. Gaadiidka da'yarta lagu qaadayaa waa inuu noqdaa mid la hubiyey inuu sugayo nabad-gelyada da'yarta, waana inuu noqdaa mid aan dhibaato iyo karaamo-darro midna u lahayn da'yarta.
2. Gaadiidka da'yarta waxaa ka masuul ah hadba ciddii da'yarta gacanta ku haysa.

## Qodobka 30aad:

### Nidaamka Cabashooyinka

1. Cabashooyinka da'yarta waxaa soo jeedin kara da'yarta, waalidkiisa, masuulkiisa ama qareenkiisa.

2. Cabashada da'yarta waxaa loo gudbinayaa maamulka xarunta da'yarta lagu hayo, oo u gudbinaaya guddiga agaasinka xataa haddii laga cabanayo maamulka xarunta.
3. Wixii cabashooyin maamul ah waxaa go'aan ka gaaraya guddiga agaasinka.

# CUTUBKA 5aad:

## Baarista iyo Xorriyad ka Qaadista Da'yarta

## Qodobka: 31aad:

### Waaxda Booliiska u Qaabilsan Da'yarta

1. Marka la doonayo in la hirgeliyo axkaamta xeerkan, xarun kasta oo booliis waxa looga baahan yahay in ay yagleesho waax si gaar ah ula dhaqanta, una baarta akhaladaadka da'yarta.
2. Marka booliisku warbixin helo uu xeerinayo xeerku, sarkaalka booliiska ee hawsha ka jawaabaya waa in uu:
   - b) Xaqiijiyaa jawi saaxiib la ah da'yarta ( oo aan cabsi ku abuuri Karin) ka hor inta aanu waraysiga bilaabin.
   - t) U sheegaa da'yarta xuquuqdiisa sharci.
   - j) Qiimeeya haddii ay dhici karto in ilmaha dhib soo gaari karto, qaadana tallaabo degdeg ah oo lagu ilaalinayo da'yarta haddii ay lagama maarmaan tahay;
   - x) Ku taliyaa u wareejinta ilmaha xirid, maxkamad ama meel lagu hayo
   - kh) Uu go'aamiyo ilaalinta nabadgelyada da'yarta.

## Qodobka 32aad:

### Xariga Da'yarta iyo Nabad-gelyadiisa

1. Da'yarta ka yar Shan iyo toban sano looma xiri karo denbi, hadii aanay nabad gelyadiisa sidaas ku jirin.
2. Da'yarta la xiro iyadoo la hubinayo nabad-gelyadooda dartood waa in si dhakhso ah loogu wargeliyaa waalidka ama qofka masuulka ka ah ama qareenkiisa.

## Qodobka 33aad:

### Fullinta soo Qabashada Da'yarta

1. Haddii aanay jirin duruufo khasbaya oo qiil u noqon kara soo xirista Da'yarta, lama soo xiri karo
2. Sarkaalka booliis ee fulinaya soo qabashada da'yarta waa in uu:

    b) Ogaysiiyo da'yarta nooca dacwadda loo haysto iyo xuquuqdooda sida xeerkan ku xusan;
    t) U sharraxaa da'yarta hababka ugu fudud ah ee ay tahay in la raaaco sida ku xusan xeerkan iyo xeer kale oo kasta oo khuseeya.
    j) Ku ogaysiiyaa muddo 24 saac gudohood ah qareenada, sarkaalka kormeerka iyo cidii adeeg bulsho bixisa soo xirista da'yarta.
3. Haddii markaa ogaysiinta ku xusan faqradda 2aad ee xarafka(j) aanu suurta gal ahayn, booliisku waa in ay u gudbiyaan xeer ilaaliyaha awoodda u leh warbixin sharaxaysa sababta.
4. Marka booliisku uu ugudbinayo xeer-ilaaliyaha awoodda u leh soo qabashada da'yarta, waa in ay ku daraan xog hordhac ah oo ka hadlaysa shakhsiyadda, bii'ada bulsho iyo nololeed ee da'yartu ku sugan tahay.

## Qodobka 34aad:

Ka hortagga isdhex galka da'yarta iyo dadka waawayn ee danbiilayaasha ah.

Waa in la sameeyaa tallaabooyin lagaga hor tagayo in da'yarta ka yar 18 sanno dhexgalaan dadka waawayn ee ku xukuman denbiyada, marka ay joogan saldhiga ama marka loo wado, ama laga soo toosinayo maxkamadda iyo inta ay joogan ama sugayaan maxkamadda.

## Qodobka 35aad:

### Xuguugda Da'yarta maxkamadaynta hore

1. Da'yarta laga xayuubiyay xorriyada waa inay xaq u helaa in :
    b) Aragtidiisa si xor ah ugu cabiro hannaanka maxkamadaynta khusaysa.
    t) Aragtidiisa maxkamaddu tixgeliso, lana siiyo culayska ay mudan tahay iyadoo la eegayo da'da da'yarta.
    j) Loona qabto qareen u dooda iyo turjumaan ka gacan siiya haddii uusan garanayn luqada maxkamada.

## Qodobka 36aad:

### Su'aal waydiinta

Sarkaalka qaabilsan da'yarta waa in aanu su'aalo waydiin da'yarta, haddii aysan joogin waalidka, Qareenka ama cidii kale ee masuulka ah.

## Qodobka 37aad:

Ku wareejinta da'yarta waalidkii dhalay ama cid kale oo ku habboon ka hor dhegaysiga maxkamadda

a. Sarkaalka booliisku waa in uu sii daayaa da'yarta ku eedaysan gelidda gef isagoo u ogolaanaya daryeelka waalidiinta ama cid kale oo ku habboon ka hor intaan da'yarta la keenin dhegaysiga hore ee maxkamadda hadii markaas:
    - b) Aanay jirin duruufo gaar ah oo keenaya in da'yarta la hayo;
    - t) La waayin Waalidka da'yarta ama ciddii kale ee ku habboonayd ama aanay joogin, lana sameeyey dadaal kasta oo suurta gal ah si loo soo helo waalidka.
    - t) Jirto khatar muuqata oo ah in da'yartu geli karto ama cid kale khatar gelin karto.

b. Sarkaalka booliis waxa uu isaga oo la tashanaya xeer-ilaaliyaha guud ama xeer ilaaliye wakiil u ah, sii dayn karaa da'yarta ku xiran saldhiga booliiska kaas oo aan ku eedaysnayn faldanbiyeed ciqaabtiisu ka badan tahay 3 sano oo xabsi ah, marka loo eego sida ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed si ay waalidkiis u siihayaan ama cid kale oo ku habboon iyagoo u hogaansamaya shuruuda ku xusan faqradda 3 aad ee qodobkan.

c. Da'yarta waxaa lagu siidayn karaa sida ku xusan faqradda 2aad, isla markaana shardi lagaga dhigayo in:
    - b) Da'yarta la geeyo goob cayiman iyo waqti cayiman si loo qiimeeyo;
    - t) In aanay carqaladayn markhaatiga caddaymaha ama aanu wax ku darsan cid ama koox gaar ah oo cayiman, iyo
    - j) In uu dego meel gaar ah.

## Qodobka 38aad:

### Sii daynta Da'yarta ee Xeerlilaaliyaha Guud

Xeer ilaaliyuhu haddii aanu ka hor imanayn go'aan booliis sida ku xusan qodobka 36aad, waxa uu amri karaa u siidaynta da'yarta waalidkiis ama cid kale oo ku haboon ka hor dhagaysiga maxkamada iyada oo la raacinayo shuruudaha ku xusan isla qodobkaas, haddii la ogolaado sii daynta waa in la siiyo da'yarta iyo qofka ka mas'uulka ah ee loo sii daayay digniin qoraal oo waafaqsan qodobka 37aad.

## Qodobka 39aad:

Waajibaadka Sarkaalka booliis iyo cida da'yarta daryeelkeeda lagu siidaayo:

1. Sarkaalka booliis ee ku sii daaya da'yar sida ku xusan qodobka 36aad ama amarka Xeer lIaaliyaha sida ku xusan qodobka xiga 38aad una dhiiba da'yarta xannaanaynta waalidkiis ama cid kale oo mas'uul ah oo ku habboon waa in uu
   b) Qoraal ahaan ugu dhiibaa da'yarta iyo cida loo soo siidaayay waraaq qoraal ah oo ka hadlaysa denbiga da'yarta lagu haysto shuruuda ku xiran siidaynta da'yarta iyo goobta iyo wakhtiga laga doonayo da'yarta in uu iska soo xaadiriyo dhegaysiga hare ee maxkamadda;
   t) Ogaysiiyo waalidka da'yarta leexday ama mas'uul ku habboon si da'yarta loo keeno dhegaysiga maxkamadda hore xilliga iyo goobta loo cayimay iyo wixii shuruuda ee kale oo ku xiran.
   j) Ogaysiiyo da'yarta in uu iska soo xaadiriyo dhegysiga maxkamada hore xilliga iyo goobta loo cayimay iyo in uu u hoggaansamo wixii shuruudo ah ee laga rabo.

## Qodobka 40aad:

### Dammaanad Ku siidayn

1. Da'yarta waxaa damaanad loogu sii dayn karaa xannaanada waalidkooda ama mas'uulkooda sharciyeed.
2. Shuruudaha ku xiran damiinashada waxaa loo raacayaa sida ku cad Xeerka Habka Ciqaabta Soomaliyed.
3. Haddii waalidka, mas'uulka sharciyeed ama qofka kale oo da'yarta ka mas'uul ah raaci waayo shuruudaha damiinashadu way burayaan.

## Qodobka 41aad:

### Ku haynta da'yarta goob nabad ah.

1. Haddii aan da'yarta loo sii dayn waalidkiis ama mas'uulkiisa duruufa jira awgood ama aan dammiin lagu sii dayn karin, waxa lagu haynayaa da'yarta meel ay nabadgelyadoodu ku jirto
2. Inta da'yarta la hayo waa in fursad walba oo macquul ah la siiyo si qaraabadiisa iyo u adeegayaasha bulshadu u soo booqdaan.

## Qodobka 42aad:

Waajibaadka booliiska ka saaran da'yarta geftay:

1. Marka da'yarta lagu hayo saldhig ay ka cawdaan dhaawac soo gaaray muddadii la hayay, sarkaalka booliis ee loo soo gudbiyay dacwaddaas waa in uu u gudbiyaa taliyaha saldhiga da'yartu ku xiran tahay, taliyuhu waa inuu amraa askariga u soo gudbiyay arrinta inuu sida ugu dhakhsaha badan ugu gudbiyo da'yarta dhakhtar si loo baaro loona daaweeyo.
2. Waa in warbixinta dakhtarka lagu daraa liiska gal-dacwadeedka ee maxkamad gaynta sugaya.
3. Sarkaalka booliis ee mas'uulka ka ah baaritaanka da'yarta waa inuu hubiyaa in da'yarta loo qiimeeyo sida ku cad qodobka 48aad ee xeerkan ka hor inta aan dhagaysiga hore ee maxkamada la guda gelin.

## Qodobka 43aad:

### Diiwaan gelinta da'yarta saldhiga lagu hayo

Sarkaalka booliis ee u xilsaaran da'yarta hayntooda waa inuu sameeya diiwaan gelin faahfaahinaysa ku haynta da'yarta ee saldhiga booliska si shakhsi shakhsi ah

## Qodobka 44aad:

### Da'yar aan la xiri Karin.

1. Xilliga baaritaanka denbiga iyo maxkamadaynta lagu qiimaynayo denbiga uu galay da'yarta ka yar 14 sano, da'yartaas lama xiri karo.
2. Haddii hab dhaqankiisu u baahdo kormeer iyo kor kala socosho, da'yarta waa in lagu wareejiyaa cidii sharci ahaan masuul ka ah, ama xarun xannaano ama xarun dhaqan toosin si loo xannaaneeyo inta la sugayo go'aanka maxkamadda da'yarta.

# CUTUBKA 6aad:

## QIIMAYNTA DACWADDA DA'YARTA GEFTAY.

## Qodobka 45aad:

### Qiimaynta Da'yarta

Sarkaalka kormeerka markuu ka helo wargelin Sarkaalka Booliska ee madaxda ka ah Saldhigga in la qabtay ama yeeritaan loo geeyay da'yar, waxaa waajib ku ah inuu ku sameeyo qiimayn da'yarta intaan la samayn dhegaysiga hore ee dacwadda.

## Qodobka 46aad:

### Qiimaynta Warbixinta

1. Sarkaalka kormeerka waxaa laga doonayaa inuu ururiyo dhamaan wixii xog ah ee ku saabsan da'yarta lagu eedeeyay inuu galay fal dembiyeed. Warbixintaa waa inay ku jiraan:
   - b) Meesha da'yartu ku nooshahay.
   - t) Waalidkooda nool.
   - j) In da'yartu la nooshahay waalidkood ama qof kale oo ka masuul ah.
   - x) Da'yartu inay xiriir la leeyihiin da'yar kale.
   - kh) Xaaladda dhaqaale ee qoyska da'yarta.
   - d) In da'yartu leedahay raadraac dembiyeed oo hore.
   - r) Warbixin kasta oo kaabaysa qiimaynta akhlaaqda da'yarta.
2. Sarkaalka kormeerka waxaa laga doonayaa inuu soo bandhigo warbixinta qiimeynta marka la joogo dhegeysiga hore.
3. Haddii warbixinta da'yarta ay ku jiraan waxyaabo saamayn ku yeelan kara karaamadiisa, waxaa garsooruhu warbixintaas ku dhagaysanayaa fadhi khaas ah oo daah xiran iyada oo ay ka soo qaybgalayaan waalidka, masuulkiisa iyo qareenka da'yarta.

# CUTUBKA 7aad:

## DHEGEYSIGA HORE

## Qodobka 47aad:

Dhegaysiga hore ee Maxkamada iyo ujeedooyinkiisa:

1. Dhegaysiga hore ee dacwadda waa in da'yartu jawaab ka bixiso falka lagu soo eedeeyey.
2. Ujeedooyinka dhegaysiga hore waxay yihiin:
   - b) In arrinta si kale loo jihayn karo oo aan maxkamadayn ahayn.
   - t) In la helo xulashada jihayn munaasib ah oo ku haboon xaaladda.
   - j) In la garto in xaaladdu ku haboon tahay in laga Wareejiyo dhegeysiga maxkamada da'yarta.
   - t) In fursad loo siiyo xeer ilaaliyaha uu ku qiimeeyo haddii ay jiraan cadaymo ku filan oo keeni kara in arinta dacwad qaadis la mariyo.
   - kh) Garsooraha Maxkamadda da'yartu marka uu qaadayo dhegaysiga hore tallaabooyinka uu marayaa waa inay noqdaan kuwo aan rasmi ahayn marka loo eego su'aalo weydiinta, waraysiga dadka iyo xog helidda.

## Qodobka 48aad:

### Goob joogayaasha dhegaysiga hare

Dadka hoos ku qoran waa inay ka ahaadaan goobjoog dhegaysiga hore:

1. Waalidka ama qofka masuulka ka ah da'yarta.
2. Haddii ay dhacdo in la waayo waalid ama qof ka masuul ah waa in garsooruhu magacaabo qof kale oo buuxin kara kaalintaas.
3. Xeer ilaaliyaha
4. Sarkaalka kormeeraha
5. Qof kastoo kale oo loo baahan yahay inuu goobjoog ahaado oo dani ugu jirto da'yarta oo garsooruhu ogolaaday.
6. Qareenka ama wakiilka sharciyeed ee da'yarta.
7. Sarkaalka Boliiska ah ee dacwadda baaray.

## Qodobka 49aad:

### Habraaca Qabashada Dhegaysiga Hore.

Marka la bilaabayo dhegaysiga hore:

1. Waa in garsooruhu xaqiijiyo da'da da'yarta.
2. Waa in garsooruhu caddeeyo qaabka loo doonayo xalka.
3. Waa in uu faahfaahiyo ujeeddada dhegaysiga hore.
4. Waa in uu sheego da'yarta nooca dembiga lagu eedaynayo.
5. Waa in uu sheego da'yarta xuquuqda uu leeyahay iyo waxa looga baahan yahay.
6. Waa in uu ka dhaadhiciyo qaabka ugu fudud ee sida xeerarku qabaan.
7. Marka da'yarta loo caddeeyo nuxurka denbiga lagu eedaynayo, maxkamaddu waa inay weydiisaa wuxuu ka oranayo waxaana loo raacayaa xeerka habka ciqaabta.
8. Haddii da'yarta lala soo eedeeyo hal ama in ka badan oo da'yar ah, waxaa waajib ah in dhegeysigu ahaado mid wadajir ah
9. Haddii la qabto dhegeysi wadajir ah, waxa laga soo saarayaa go'aan la xiriira qof kasta Denbigiisa.

## Qodobka 50aad:

Dhagaysiga hore iyo awoodaha garsooraha maxakamadda da'yarta:

1. Garsooraha maxakamadda da'yartu waa inuu raadraac ka sameeyo talaabooyinka hore ee dhegaysiga maxakamadda
2. Gaarsooraha maxakamadda da'yartu wuxuu samayn karaa: -
    - b) Inuu u yeero ama faro qof kasta oo loo baahdo inuu goob-joog ka ahaado dhegeysiga hore.
    - t) Inuu cid ka dalbo dokumenti kale ama xog loo baahdo oo khusaysa dhegeysiga hore.
    - j) Wuxuu qaadayaa tallaabooyinka uu u arko in loo baahan yahay ee uu ku ogaan karo xogta runta ah.
    - x) Garsooruhu wuxuu amrayaa sarkaalka kormeeraha inuu faahfaahiyo ama sababeeyo xogta lagu soo qoray qiimeynta.
    - kh) Garsoorahu waa in uu hubiyo warbixinta boliiska ee ku saabsan qabashada da'yarta, taasoo uu soo sameeyey sarkaalkii qabashada fuliyey.

## Qodobka: 51aad:

### Haynta dheeradka ah ee da'yarta ka dib dhagaysiga hore.

Garsooraha da'yartu wuxuu amri karaa in da'yarta lagu sii hayo xarig sababahan dartood:-

1. Hakinta habsocodka dhegaysiga hore.
2. In masuulka da'yarta ama waalidkii buuxin kari waayaan shuruudihii damiinashada sabab kasta ha ku timaadee.

## Qodobka 52aad:

### Dib u Dhigga Dhegaysiga hore

Garsooraha da'yartu wuxuu dib u dhigi karaa dhegaysiga hore muddo aan ka yarayn 24 saacadood haddii aanay ka hor imanayn danta da'yarta aana ka badnayn 7 maalmood.

# CUTUSKA 8aad:

## Has Raaca Maxkamadda

## Qodobka 53aad:

Samaynta maxkamadda da'yarta xeerka u gefta.

1. Marka la fulinayo axkaamta xeerkan, maxkamad kasta (Darajada 1aad iyo Racfaanka) waxa laga dhex samaynayaa qaybaha da'yarta kuwaasi oo awooddoodu tahay dhagaysiga iyo go'aan ka gaarida dacwadaha da'yarta la xiriira.
2. Maxkamadda da'yartu waxay ka koobnaanaysaa saddex garsoore oo mid ka mid ahi yahay guddoomiyaha maxkamadda
3. Marka laga reebo khibradaha uu ku waajib yeelayo garsoorayaasha xeerka nidaamka garsoorka Soomaliyeed, garsooarayaasha da'yartu waa inay khibrad gaar ah u yeeshaan arrimaha dhibaatooyinka da'yarta.
4. Maxkamadda da'yartu waxay yeelanaysaa shaqaale hoose oo caawimaad ka gaysta habsami u socodka shaqada.

## Qodobka: 54aad:

### Noocyada iyo muddada maxkamad horgaynta da'yarta.

Da'yarta waxaa maxkamad lagu hor gayn karaa:-

1. Xirid
2. Yeeris Maxkamadeed.
3. Haddii lagu qabto denbiyada aan u baahnayn amar qabasho si waafaqsan Qodobka 35aad ee xeerka habka ciqaabta Soomaaliyeed (XHC).
4. Waa in lagu horgeeyaa Da'yarta Maxkamadda 48 saacadood gudahood.

## Qodobka 55aad:

Habka Qaadista (fadhiga) Maxkamadda Da'yarta:

1. Maxkamadda Da'yartu waa in fadhigeedu ka duwanaadaa fadhiyada kale ee maxkamada goob ahaan iyo waqti ahaan (qol ama dhisme gaar ah waa in lagu qaadaa dacwadda ama maalmo gaar ah), waana in aan cid kale loo ogolaan in ay soo xaadirto dhegaysiga maxkamada marka laga reebo -
    - b) Xubnaha iyo madaxda maxkamada;
    - t) Dadka qaybta ka ah dacwadda, qareemadooda iyo markhaatiyaasha iyo cid kasta oo kale oo ay khusayso dacwaddu;

j) Waalidka ama masuulka da'yarta maxkamda la horgeeyey.
x) Ama cid kasta oo kale oo amar u haysata u xaadirista dacwadda.

## Qodobka 56aad:

Gargaarka waalidku u fidinayo Da'yarta

1. Waalidka ama qofka masuulka ka ah da'yarta waxaa waajib ku ah inay ka kaalmeeyaan marka dacwadda lagu qaadayo maxkamada da'yarta iyo markasta oo kale.
2. Marka waalid ama qof ka masuul ah da'yarta la waayo iyadoo baadi goob iyo dadaal macquul ah loo galay oo aanay dib u dhaca dacwadda da'yarta dani ugu jirin, markaa waa in uu joogo qof masuul ah oo garsooruhu u magacaabay.

## Qodobka 57aad:

### Habka furitaanka dacwadda

Bilawga furitaanka dacwadda garsooraha da'yartu waa inuu: -

1. U sheego danbiga lagu soo eedeeyey iyo nuxurkiisa.
2. U sheego xaquuqdiisa.
3. U sheego waxa looga baahan yahay marka eeda loo akhriyo.
4. Marka da'yarta loo caddeeyo nuxurka denbiga lagu eedaynayo, maxkamaddu waa inay weydiisaa wuxuu ka oranayo waxaana loo raacayaa xeerka habka ciqaabta.

## Qodobka 58aad:

### Caddaymaha

Haddii aanu xeerkani si kale u sheegin, dhammaan habka la xiriira caddaymaha waxaa lagu dabaqayaa Xeerka Habka Ciqaabta inta uu kala socon karo.

## Qodobka 59aad:

### Su'aalaha liddiga ah

Ma banaana in da'yarta la waydiiyo su'aalaha liddiga ah ama wax u dhimaya dareenkiisa iyo qaabka sugidda caddaaladda waxa keliya oo la weydiin karaa su'aalaha la xiriira dacwadda.

## Qodobka 60aad:

### Ogolaanshaha Caddaymaha.

1. Maxkamadda da'yartu waxay caddayn ahaan u ogolaan kartaa caddaymaha ku yimid qiraalka ee loo qaaday sida ku cad xeerka habka ciqaabta, waxay kaloo qiraal ka qaadan kartaa marka ay goobjoog ka yihiin waalidka, masuulka, qareenka ama wakiilkiisa sharciga ah ee da'yarta.
2. Lama ogola caddayn la xiriirta safka aqoonsi da'yarta (identification Parade) ee maxkamadda iyadoo aanay goob joog ahayn dadka faqrada hore ku xusan ee metelaya da'yarta.
3. Maxkamaddu waxay weydiin kartaa qof kasta oo ku lug leh dacwadda caddaymo kale haddii ay u aragto inay sidaasi dan u tahay da'yarta.

## Qodobka 61aad:

Dhegaysiga dacwadda ay ku wada jiraan da'yarta iyo dad gaangaar ah.

1. Markay da'yar iyo qof weyn ay wada galaan dembi isku mid ah oo wada jira, waa in la kala qaado,
2. Waxay maxkamadda da'yartu iskeed u amri kartaa in dacwad la mideeyo waxa kale oo sidaas codsan kara xeer-ilaaliyaha ama qareenka difaaca.
3. Mideynta dacwadda waa in lagu qaado maxkamadda da'yarta.

## Qodobka 62aad:

### Muddada Dacwadda

1) Maxkamadda da'yartu waa inay dacwadaha da'yarta la eedeeyey sida ugu macquulsan u dedejiso oo hubiso in la xadeeyo wakhtiga dib u dhigista dacwadda muddo ahaan.
2) Maxkamadda Da'yartu waa inay qaadista dacwadda da'yarta ku dhameystirto muddo saddex bilood ah (3 bilood) oo ka bilaabmata maalinta da'yarta eedda loo akhriyey.
3) Haddii da'yartu xiran tahay ayna dacwaddu ku dhamaan weydo, mudada la cayimay waxaa da'yarta dacwadooda lagu dhegaysanayaa dibad joog.
4) Haddii aan eedi jirin da'yarta lama hayn karo muddo saddex bilood ka badan.

# CUTUBKA 9aad:

## XUKUNKA

## Qodobka 63aad:

### Xukunka

1. Markay maxkamaddu gaarto ku dhawaaqa xukunka waa inay xukunka u ridaa si waafaqsan xeerkan.
2. Waxaa u banaan maxkamada in ay kaalmaysato, cid kasta oo ay u aragto khabiir, waxaa kale oo banaan in la baaro da'yarta guud ahaan xaaladooda caafimaad oo dhan, ka hor intaan dacwadiisa go'aan laga gaarin, da'yartana waxa lagu haynayaa meel munaasib ah.
3. Qaabka xukunka waxaa loo raacayaa xeerka habka ciqaabta somaliyeed wixii aan ku xusnayn xeerkan.

## Qodobka 64aad:

### Ujeedooyinka Xukunka

Ujeedooyinka xukunka ee ku xusan axkaamta xeerkan waa in ay noqdaan: -

1. Kuwa ku dhiirigeliya da'yarta gefay in ay fahmaan saamaynta ay yeelan karto dhibta uu gaystay iyo in uu masuuliyadda arrinkaas qaado.
2. Xoojinta jawaab ku kooban da'yarta oo laga baxsho falka uu sameeyay taas oo ku habboon duruufta da'yarta geftay, una dhiganta duruufta ku gadaaman denbiga;
3. Dhiirigelin dib ugu toosinta da'yarta geftay qoyskooda iyo bulshadooda ;
4. Xaqiijinta kormeerka loo baahanyahay, talo siinta, daawaynta ama siinta adeegyada qaybta ka ah xukunka iyo ku caawinta da'yarta in ay noqdaan kuwa la jaanqaada bulshadooda.

## Qodobka 65aad:

### Xirista (Xabsi gelinta)

1. Ciqaabka denbi ee lagu qaadayo da'yarta u dhexeeya 14 sano ilaa 18 sano waa in ay noqdaan kuwa soo socda:
   b) Xabsiyayn dheer, dhexe ama gaaban oo aan ka badnayn saddex meelood oo meel inta uu mutaysan lahaa qof wayn.

2. Haddii xabsiga da'yarta lagu xukumay uu ka yaryahay saddex sano, maxkamadda da'yartu waxa ay amri kartaa in uu ku qaato xarun edbin.
3. Marka da'yartu gaarto da'ada 18 inta uu ku guda jiro qaadashada xukunkiisa waxaa loo wareejinayaa xarun dhaqan toosin oo gaar u ah dadka waawayn si uu ugu dhamaysto inta uga dhiman xabsiga.
4. Da'yarta waa in lagu hayaa goobaha da'yarta lagu dhaqan celiyo.

## Qodobka 66aad:

### Xukunka bulshadu gaarto

Maxkamada da'yartu waxa ay u wareejin kartaa xukunka da'yarta geftay mid ka mid ah khiyaaraadka ama qaababka dhaqan toosin ee ku xusan cutubka 3aad ee xeerakan.

## Qodobka 67aad:

### Da'yarta mutaystay in lagu meeleeyo xarun dhaqan toosin

Maxkamadda da'yartu way xukumi kartaa in da'yarta geftay lagu hayo oo kaliya xarun dhaqan toosin marka uu galo denbiyada soo socda:

1. Danbi ciqaabtiisu dil gaarsiisan tahay;
2. Danbi ciqaabtiisu xabsi daa'in gaarsiisan tahay;
3. Xabsi aan ka yarayn toban sano;
4. Da'yarta oo noqda caadaystayaal denbi;
5. Da'yarta oo ay caddaato in uu bulshada halis ku yahay.

## Qodobka 68aad:

### Ciqaabaha Manuuca ah in Da'yarta lagu qaado

Maxkamadda da’yartu kuma ridi karto da'yarta geftay ciqaabaha soo socda:-

1. Xabsi daa'in
2. Dil
3. Shaqo khasab ah

# CUTUBKA 10aad:

## Qodobo Qubanayaal ah

## Qodobka 69aad:

### Hor istaagid

Cidkasta oo ka hor istaagta guddiga agaasinka, Sarkaalka Kormeerka, booliska ama cid walba oo kale ee loo igmaday xafiis ama howl ee iyada oo ku guda jirta gudashada mas'uulideeda ku xusan xeerkan, waxa loo aqoonsan denbiile waxaana lagu xukumayaa xabsi aan ka yarayn lix bilood iyo ganaax aan ka badnayn shan milyan oo shilin Soomaali ah.

## Qodobka 70aad:

### Baahinta Reebban

1. Waxaa reebban baahinta magaca ama cinwaanka qof kale ee la xiriirta gar-maqalada maxkamada da'yarta, sidoo kale magaca ama cinwaanka dugsi ee da'yartu dhigato, sawirka qofka iyo dhammaan waxii kale ee keeni kara in la aqoonsado da'yartaas,  haddii aan maxkamadda ogolaansho laga haysan.
2. Qofkii ku xadgudba faqrada koowaad ee qodobkan wuxuu noqonayaa denbiile, waxana lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badnayn labo milyan oo shilin soomaali ah.

## Qodobka 71aad:

### Rafcaanka

1. Go'aan kasta oo ka soo baxa maxkamadda da'yarta waxaa laga qaadan karaa rafcaan.
2. Habka loo raacayo rafcaanka waxaa lagu fulinayaa qodobada Xeerka Habka Ciqaabta.

## Qodobka 72aad:

### Xeerar Samayn

Wasaaradda Caddaaladda, iyada oo la tashanaysa wasaaradaha kale iyo hay'adaha garsoorka ee ay khusayso, waxa ay soo saari kartaa xeerarka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan:

1. Arrin kasta oo uu Xeerkan ogolaaday in xeer hoosaad loo sameeyo;
2. Hirgalinta iyo fulinta waaxyaha ay khusayso ee hay'adaha dawladdu ku dhaqan galinayaan Xeerkan.
3. Wixii kale ee lagama maarmaan ah ama ah hab la dajiyo si loogu guuleysto ama sare loogu qaado fulinta ujeedooyinka Xeerkan ..

## Qodobka 73aad:

### Burin

1. Xeerkan waxa uu burinyaa oo wax kama jiraan ka soo qaadayaa dhammaan wixii xeerar ama sharciyo hore ahaa ee lagu xukumi jiray denbiyada da'yarta geftay wixii aan ka ahayn axkaamta shareecada Islaamka iyo Dastuur-ka
2. Waxa kale oo bannaan in lagu fuliyo denbiyada lid ka ku ah xeerkan: axkaamta Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Madaniga ah, !yo Xeerka Habka Madaniga ah iyo sidoo kale sharciyada la xiriira lana jaanqaadaya axkaamta iyo Ujeedooyinka Xeerkan.

## Qodobka 74aad:

### Dhagan galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

Md. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas

Madaxweynaha Dawladda Puntland.